Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Barlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad

Documentiga kalfadhiga 5-aad kulankiisa:17-aad

Kalfadhiga 5-aad **Tr:14/12/2014**

Kulankiisa:17-aad, sacada furitanka.11:57 gh, sacada xiritanka.1:35 gd.

Guntinta: **142xildhibaan**.

Ajendaha:

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Su'aalo Oraaheed la Weydiinayo Xeer-ilaaliyaha iyo Hanti- Dhowraha

Guud ee Qaranka.

4.Iyo Wixii kale oo Howl ah.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, waxaana lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha shacabka wuxuu xildhibaanada uu weydistay in ay ansixiyaan Ajendaha weyna Ansixiyeen.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey 8/12/2014, in ay na soo gaartay warqad codsi ah ay soo saxiixan 12 xildhibaan, oo ay ugu yeerayaan Xeer-ilaaliyaha iyo Hanti Dhowraha Qaranka si ay su'aal oraaheed u weydiyan,sidaa darted waxaan ugud binay in ay manta noo yimaadan si ay Golaha u horyimaadan su'aalana loo weydiyo.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey, in Hanti Dhowraha Guud ee Qaranka DR:Nuur Jimcaale Faarax, loo doortay (A.U) in uu la shaqeyo waan u hambalyeynayaa.

Qod.28, F.1, ee xeer-hoosadka waxa uu qexayaa,su'aal oraaheedka in ayna ka bad naan 90 daqiiqo, qaabka su'aalaha sida uu qabo xeer-hoosadka waa in lagu ixtiramaa, Qod.78,in su'aalaha ka badnaan hal daqiiqo, ka jawaabista in ayna ka badnaan 3daqiiqo.

Xildhibaan:Bashiir Cadow Calasow,wuxuu soo jeediyay,wax walba oo lagu dhaqMo in ay sharci yihiin ayaan ognahay ciqaab wadareedka saameynaysa, wasiir iyo wasiir ku xigeen, wasiiru dowlo in ay ka joojiyaan safarka waxaa lagu joojinkaraa arin maxkamadeed ,Golaha wasiirada ma safri karaan dhamaantood waxey noqoneysaa in ay yihiin dambiilayaal qof aan mutahim ahayn in meel looga dhaco waa dambi muwaadhinka waa bari, waxaa la yiri mutahimka waa in uu fasax weydista xafiiska Madaxweynah waxaa kaloo la yiri ku tagri fal awodeed maxey tahay? Waxaa la darsay suurta galnimowaa hadal suuqeed ma noqon karaan wax laguciyaaro qofka safrayo in uu fasax ka soo qaato xafiiska halkey ku qorantahayHal warqad in labo xafiis oo kala madax banana in ay isla saxiixan xagey ku qoran tahay faah-faahin naga sii sharcigese waa faqsan.

Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka,Mudane:Dr:AXmed Cali Daahir,mudanayaal waan idiin salaamay waan ku faraxsanahay in aan idiin hor imaado,dhamaan waxay ku faah-faah sanyihiin warqadaan ,Gudoomiye su'aasha iyo jawaabta waa kala baaxad weyn yihiin 3daqiiqo wey yartahay waxan codsanaa in waqtiga wax la iigu daro, waad ku darsan kartaa.

Xildhibaanka Bashiir waa mahadsan yahay,waad ogtihiin in wadanka ay ka jirto xaalad adag sida,dagaalo nabad diidka,abaaro,fatahaad,biyo la'aan,barakacyaal.

Jiritaanka ku tagri falid awoodeed,dhamaan waxaan wareegto ka soo sarnay,wasiirada,wasiir ku xigeenka, wasiiru dowlayaasha,in ayna safri Karin,xafiiska hanti dhowraha qaranka iyo xafiiska xeer-ilaaliyaha waxay baaris ku soo gaba-gabeyan 19 wasaaradood iyo 3 hay'adood oo kale oo la socda,in ta kale oo hartay hadaa la rabaa in la galo mar dhow,19 wasaaradood mid ayna ka jirin korobshan baahsan ama ku tagri fal hanti dadweyne iyo 3 hay'adood oo an ahayn wasaarad,waxaan leenahay cidii xasaanad leh in laga qaado kuwa xasaanada aan lahayn in la horgeyn dono sharciga,waxaa jirta wasaarado qaarkood in ay sameyan ku xad gudub wadankeena waxaka jira in aan loo aabo yeelin qeynuunka iyo ku dhaqanka sharciga,waxaa dhici karta hadii aad tiraahdo waxaan qaanuun maaha in lagula yaabo 5bil ka hor inta aan imaanin xafiiskaan ma la heyn qasnaji,xisaabiye,madax maamul lacageed,wuxuu maamulayay hanti qaran mushaar ayuu soo qaadayay,taasi hay'adaha dowlada oo dhan ayay ka wada jirtay,waan wada saxnay hay'adaha dowlada waan wada ogeysinay.

Xildhibaan:C/qaadir Baq-daadi,wuxuu soo jeediyay,sida dhago furnaanta Dastuurka an heysano waa up date qaanuuni ah, qofka xoriyad ayuu leeyah xeer ilaaliyaha wuxuu heystaa Dastuurkii hore qofka wasiirka ah wuxuu leeyahay awood hadii uu dambiga ku cadeyn laguma soo rogi karo xeer-ilaaliyaha waa in uu raali garayn bixiyaa 33 xildhibaan ayaa wasiiro ah kuligood ma dambiilaa arintaan ay soo qoran waa qalad,54 wasiir hadii uu halka dambile yahay kuligood mawada dambila, waa in ay raaligareyn ka bixiyan.

Xildhibaan:Guraase,wuxuu sheegay,hadii an nahay golaha wasiirada waad nagu xad gudubtay waxad naga dhigtan dambiilayaal, in Qod.35aad, Qod.21aad,uu xuquuq siinayo Shacabka,waa lagu xad gudbay wasiirada waa in xaakim naloo keno idiin sheego in aad dambiilo tihiin xeer-ilaaliyaha wa in uu raali galin ka bixiyaa.

Xildhibaan:Daahir Aamin Jeesow,wuxuu soo jeediyay,xeer-ilaaliyaha wuxuu arkay musuq-masuq mahan in la yirahdo bixi raali galin Guddoomiye, Hanti dhowrka wa a in loo diraa guddiga maaliyadda, xeer-ilaaliyaha waa in loo diraa guddiga garsor ka si ay u soo baraan arintaan.

Xildhibaan:Fanax,wuxuu sheegey,xukuumada kalsoonida waa lagala noqday inta aan xilka laga qaadin wasiirada maxaa su'aalo loo weydin waayay,maxaa hada ku soo bagey oo loo weydinayaa.

Xeer-ilaaliyaha Dr:Axmed Cali Daahir,wuxuu sheegay, qofka hadii uu fal dambiye-ed galo qaanuunka ayaa qabanayo 19ka wasaaradood iyo 3 hay'adood oo an kor-obshan bahsan ka helin majirto maxkamad ayaan geynayna oo waa la dhageysana yaa maxkamada ayaa cadeynayso in uu dambi leeyahay iyo in uu dambi laheyn,wa An soo dhaweynayaa raaligalinta ay xildhibaanada ay ii soo gudbiyeen,waxaan idi-in sheegayaa sharciga ayaa ii ogol ka hortag,ka daba tag,faldambiyeed kama bix-inayo raali galin,laakiin xildhibaan ama qof aan u geystay gaf iyo aflagado wan ka bixinayaa raali galin, shaqo qorista xad gudub baahsan ayaa ka jira wasaaradaha ee daysanayaal maahan waayo wali adoda nagama soo gaarin, laakiin waa tuhun iyo baaris halkaas ayay mareysaa markii ay soo dhamato ayaan idiin dhihi karna waa dambiile iyo maahan,xil wareejinta waa sharci ama qaanuuni, masu'l kasto markii uu xilka ka tagayo anigaba aan ugu horeyo in uu xilka wareejiyo,Qod.24ad F.5aadxeerka habka ciqaabta soomaaliyeed wuxuu qeexayain ay jirto sababo ca d oo keeni karta in uu bur-buriyo faldambiyeedka wadankana ka bixi kara,xeer -ila aliyaha iyo dambi baarayaalka in ay xayiri karaan safarkoda iyo hantidoda,ayago weydisan waaran ,laakiin waa in ay jirto sababo macquul ah, markasto qofka wax a uu leeyahay 8maalmood inuu garsooraha ugu dhow ku ansixiyo, sharcigii 1962 ee lagu shaqeynayay waxaa bur-buriyay Barlamaanka.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu soo jeediyay,wadankena labo cadow ayaa heysta oo kala ah shabaab iyo musuq-maasuq,waa ilaa hay mahadis hadii an manta ka had leyno musuq-maasuqa aniga xildhibaan ay ahay wasiirna waan ahay diyaar baan u ahay hadii laygu helo dambi in laygu qaado sharciga,waan soo dhaweynayaa xeer-ilaaliyaha iyo hanti dhowraha waan idiinku amaanayna wan idiin tagareyna

Xildhibaan:Becos,wuxuu sheegay, hadii xafiiskaga la keeno dacwo dhameystiran meeqa maalmood ayad heysankarta,marka waran lagu keno oo ad sameyso baari-taan ma in aad maxkamad u gudbisa mase in aad xafiskaga ku haysid.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yuusuf,wuxuu soo jeediyay,Barlamaanka maahan in uu difaaco qof dambi galay waxaa loo baahan yahay in sharciga lagu qaado waxad tirahden marka qof baxayo waa in aad Madaxweynaha fasax ka qatato, aniga Madaxweynaha si toos ah uma hoostago Golaha Barlamaanka ayan fasax ka qada- naya,Golaha wasiirada xukuumada ayay fasax ka qadaneysa,Madaxweynaha shaq-O kuma lahan,ee waxaad donaysan in aad Madaxweynaha bawor ugu dhigtaan in uu wax walba faraha la soo galo.

Xeer-ilaaliyaha Dr:Axmed Cali Daahir,wuxuu sheegay,markii aad safreyso waa lo baahan yahay in aad qaadatan warqada fasaxa,xafiiska xeer-ilaaliyaha waad ogtih-iin in uu kulmiyo dhamaan hay'adaha dambi baarayaasha, hadii ay dambi ay soo baran waxey u geeyan xeer-ilaaliyaha sida,C.I.D,Nabadsugida,Turbitariyo,Magare-shinka kuligood waa hay'ado dambi baaris, hanti dhowraha marka uu ii soo gudbiYo ku tagri fal hanti dadweyne, waxaan si wada jir ah u soo sarnaa wareegto,qof kasto waxaa loo aqonsan yahay in uu wax lunsaday laakiin mabd'asi mahan qaanu uni, marka maxbuuska la soo qabto 48sac ka badan lama haysan karo,waxaa loo diraaya dambi baaris waxeyna ku xirantahaynooca dambiga,waxaa ugu horeya 7maalmood waxa ugu badan 90 maalmood,hadii kalsoonida lagala noqday xuk Umada inta uu xilka wareejinayo wasiirka waxay awoda ku waregeysa xafiska Madaxwey naha oo ay fasax ka qaadanayaan.

Xildhibaan:C/laahi Godax Bare,wuxuu soo jeediyay,way xanuun badan tahay ma-rka aad qaranka shaqo culus u heyso shaqadadana ay noqoto in la siyaasadeyo xildhibaanadii u yeeray nimankan raga ah oo shaqeysanayo waa wey siyaasaded waxay halkan ka soo jeediyan shaqo aan ku qanci karno,waxan soo jeedinaya xeer-ilaaliyaha iyo hanti dhowraha in ay shucubtoda la qeyb sadan Barlamaanka iyo shacabka adinkoo shaqadina qabsanaya.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Fadhayo,wuxuu sheegey,warqadan wareegto mah-an degreto mahan waa xukun, xeer-ilaaliyaha awood ma u leeyahay in uu yirahd-o Madaxweynaha ha bixiyo warqad fasax in labo hay'adod oo siman in ay hal wa arqad ay yirahdan amar ayan ku soo sarayna meeshay ku taal ayaa laga rabaa Qod.10aad, F.2aad,karamada adanaha waa in aan mel looga dhicin dad

masu'liyiN oo shaqeynaya oo wali xilkii lagala wareegin in loo diyaariyo maxkamad,anaga ma garankarno sharcigan, in agaasimeyal la wada xiro anaga kuma wada qanci karno waa in ay cadeeyan.

Xildhibaan:Muuse Sheekh Cumar,wuxuu soo jeediy,hanti dhowraha iyo xeer-ilaaliyaha way wanaagsan yihiin,waa fursad in lala xisaabtamo qofkii hanti dowlad lun sada Tr: 6/12/2014,marka aad soo qoreysan maxaad Wax ugu qaban weysan mun itar group,oo xukuumadi C/wali u adeynaysan iyagoo aan xilka wareejin.

Xeer-ilaaliyaha Dr;Axmed Cali Daahir,hadii la yiraahdo Dastuurka xoriyad buu isiyay hadan xasaanad buu I siiyay hadad sharciga dhinac marto waa ku qabanayaa Kan yiri maxaad ugu soo beegtan markii xukuumada dhacday ee waa la siyaasadeyay,waqtigii ay ku habooneyd baan qaadnay waqtigii ku habooneyd waan fulinay, hanti dhowraha inta uu tago xafiska uu albaabada u xirto ayuu la xisaabtamayaa,waa tiknikal in aan hal warqad isla saxiixno oo wareegto ku soo saarno.

Xildhibaan:Cbdinasir Gaarane,wuxuu soo jeediyay,waan u mahad celinaya labada masu'l dalkena wuxuu ku soo labanayaa la xisaabtan iyo sharci xeer-ilaaliyaha hadii uu horteena ka sheegey warbixin cad waan u baahnayn dad aqoon leh barlamaanka waa idiinla shaqeynayaa waan idin garab istaageyna.

Xildhibaan:Maxamed Afaraale,wuxuu sheegey,19 wasaaradood oo la soo eedayay hanti dhowraha ma baaray hadii uu baray uu sax yahay maxaa markaas loo gud bin waa yay oo lo xiri waa yay, waa arintii I.C.G. oo kale oo lahaa soomaaliya korobshan ayaa ka jira.

Xildhibaan:Cabdi Maxamuud Abti doon,wuxuu sheegey,xeer-ilaaliyaha ha no sheego baaritanka wadanka waxa ka jira bolitical karays,waxaa kuu cad in meesha siyaasad ku jirto sida loo kala hadlayo qofka labaaro hadii uu wasiir yahay iyo hadii uu yahay qof kale waa in loo shegaa natiijada baaritaanka,waa in uu safrin ama dhaqdhaqaqin ilaa maxkamada go'aan ka gaareyso, xeer-ilaaliyaha iyo ha-nti dhowraha dariqii saxda ah maracin,waa dariiq

siyaasadaysan,warqadas waa in loo gudbiyaa garsoorka ka dibna lagu soo celiyaa Barlamaanka.

Xildhibaan:Cabdi Cali Xasan,wuxuu soo jeediyay,labada masu'l waan u mahad celinayaa,waxaad gasheen labo danbi oo ah, laba shaqsi oo hal warqad ku wada saxiixan hanti dhowraha maxukuntid laakin shaqo ayaa idinka dhaxeysa,xeer-ilaaliyaha qalad ayuu galay hay'ad uu san xukumin ayuu leeyahay aniga xukumo Halkan wuxuu ku soo qorey go'aan maxkamadeed golaha Barlamaanka wuxuu ku oran karaa jooji,waa in aad baratan albaabka laga soo galo Baarlamaanka ah guddiyada idiinla shaqeynaya.

Hanti Dhowraha Guud ee Qaranka Dr:Nuur Jimcaale Faarax,wuxuu sheegey,wa-nidiin salaamay dhamaan mudanayaalka,waxaa wada shaqeyn naga dhaxeysa gu-ddiga maaliyada isbuuci haljer ama laba jer ayan kulana,talada waan idiinla wad-agnaa xafiiska hanti dhowraha cidkale uu shaqada la wadaago majirto,wixii qalad-aad an soo helno wan idinla wadagayna,wadanka process ayaa ka jira waxan so sameynay baris way ogyihiin wasiirada,wasiir ku xigeenka,wasiir dowlayasha,tuhu n cid aan ku dacweynayno ma jirto markaan dhameyno baaritanka,waxaan ogeysi inayna guddiga maaliyadda ee Barlamaanka,waxaan idiinka codsaneyna in aad xafiiska hanti dhowrka garab siisan,guddiga maaliyadda oo an wada shaqeyno wa laga ogyahay ilaa heer caalami, waxaan bilownay maalinti musuq-maasuqa si an shaqada u wadaagno,waxan idinka codsanaynaa in aad garab nasiisan,waxan raali galin ka bixinaya warqadii saxiixa naga wada dhaxeysay oo ah Xeer-ilaliyaha iyo hanti dhowrka arintaas waa inaad ka raali noqotan,waayo wadamada dariska sidaas ayay ku dhaqman.

Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka,wuxuu sheegey, anaga waxaan rabna in aan ku dhaqano nidaamka soomaaliya,waa in aad soo jeedisan barito 30 daqiiqo oo talooyin sax iyo qaladba si aan ugu gudbino Madaxweynaha iyo xukuumada in an qaadano minidka si aan su'aalo ugu diyaarino.

Xildhibaan:C/qaadir Baq-daadi,wuxuu soo jeediyay,xeer-ilaaliyaha iyo hanti dho-wraha waxaa loogu yeeray su'aal oraaheed oo 90 daqiiqo, hadii xildhibaanada ay ku qanci wayan su'aal wadareed baan galeyna.

Xildhibaan:Cusmaan Aadan Dhuubow,wuxuu sheegay,waxaa loo baahan yahay in Barlamaanka qaladkiisa uu qaato waxey ahayd in la xisaabiyo arintan timid waa mid siyaasadeed,waxaa loo baahan yahay in la joojiyo documenyiga aaway hantida shacabka ay lahayeen oo la lunsaday qaranka un baa la shagayaa dad badan ayaa wadanka ku dhibaataysan oo hantidooda la dhacay taas lagama hadlayo.

Xildhibaan:Yaasiin Cabdi Seed,wuxuu soo jeediyay,in aan baahi u qabno xeerilaaliye iyo hanti dhowrka, waan ognahay arintan hada waa bilow,wax kasto oo bilow ah saxeeda iyo qaladkeeda waa yeelan kartaa, marka ugu horeyso minankan waa mahad sanyihiin hadii ay wax qalden waan saxeynaa, waa in an nidaamka ilaalino.

Shir Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu shir Guddoominayay kalfadhiga 5-aad kulankiisa: 17-aad,uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:35 gd.